

Waxaa la soo gaaray waqtigaa ilmahaaga u dalbi lahayd fasalka barbartooniga

Halkaan waxaa ku qoran macluumaad loogu talo galay waalidka haysta ilmo lix jir ah oo bilaabaya fasalka barbartooniga ah deyrta 2021.

Waxaad u baahantahay inaa dalbato dugsiga aad rabto inuu ilmahaaga bilaabo. Waxaad dalban kartaa dugsigii aad ka rabto degmada gudaheeda. Doorashadaada waxaan u tixgelineynaa sida ugu macquulsan. Haddii dalabka uu ka bato boosaska la haayo markaas ardayda waxaa loo siinaa booska sida ay ugu kala dhowyihiin dugsiga.

shabakadeena orebro.se/sokaskola waxaad ka aqrisankartaa sida boosaska dugsiyada loo qeybiyo. Halkaan waxaa kaloo ka heleysaa liiska dugsiyada ku yaala degmada Örebro, kuwa degmada maamusho iyo kuwa gaarka ah.

Dalbo dugsiyada degmada maamusho 15 janaayo–31 janaayo

Markii aad go'aansatid dugsiga adiga iyo ilmahaaga aad daneyneysaan waxaad iska diiwaangelineysaan adeegeena elektarooniga ah. Waxaad dooran kartaa adoo kala hormarinaaya ilaa shan dugsi. Labada waalid ee mas'uulka ka ah ilmaha waa inay haystaan emeyl shaweynaaya iyo Bank-ID. Si codsiga ansax u noqdo waa in labada waalidba ay saxiixaan adeega elektarooniga ah ugu dambeyn 31 janaayo.

Haddii aadan isticmaali karin adeega elektarooniga waxaad ku soo dalban kartaa foom waraaq ah. Foomka waxaa ka heleysaa orebro.se/sokaskola ama waxaad ka soo qaadaneysaa Servicecenter.

Adeega elektarooniga ha wuxuu furan yahay inta lagu guda jiro **xilliga dalbashada 15 janaayo–31 janaayo**. Haddii aad ku soo dalbaneysid foomka waraqda ah waa inuu degmada Örebro soo gaaraa ugu dambeyn 31 janaayo ayna ku saxiixnaadaan labada waalid ee mas'uulka ah. Haddii kale ansax ma noqonaayo codsiga.

Ugu dambeyn dhamaadka maarso waxaa ku soo gaaraaya go'aanka ah dugsiga uu ilmahaaga bilaabaayo.

dugsiyada gaarka loo leeyahay

haddii aad rabto inaa dalbatid dugsiyada gaarka loo leeyahay dugsi ayaad toos ula xiriireysaa, boosaskooda ayagaa maamula. Markaa dalbatid dugsi gaar loo leeyahay isla markaa waxaad dalban kartaa dugsi degmada maamusho. Haddii markaa aad go'aansatid inaa dugsi gaarka loo leeyahay aadid waa inaa la soo socodsiiisa Servicecenter.

gaadiid ku qaadida ardayda

haddii dugsi cusub uu idin jiro wax ka badan saddex kiilomitir wuxuu ilmaha xaq u yeelan karaa in gaadiid lagu qaado. Masaafada waxaa laga bilaabaayaa cinwaanka uu ilmaha ku diiwaangashanyahay ilaa iyo dugsi ay degmada geysay ilmaha, xitaa haddii ardaygu doortay inuu aado dugsi kale.

Waxaan kugula talineynaa markaad dalbaneysid iskuulka inaa la dalbatid in ilmaha gaadid u baahanyahay. Markaa waxaad heleysaa go'aan ku saabsan qaaditaanka ilmaha intaa dugsiyada bilaaban. Gaadiidka dugsi waa in la dalbadaa bilawga sanad dugsiyeed walba.

Xarunta xilli firaaqada

Haddii ilmahaaga u baahanyahay dugsi ka dib inuu sii joogo waxaad dalbaneysaa xarunta ilmaha lagu cayaarsiiyo xilliga waxbarashada ka dib marka aad hesho go'aanka dugsi uu ilmahaaga bilaabi doono.

Halkaan waxyaabo badan ayaad ka ogaan kartaa

shabakada orebro.se/sokaskola waxaad ka aqrisan kartaa sida dugsi loo dalbado waxaad kaloo ka heleysaa macluumaad ku saabsan gaadiidka dugsi iyo xarumaha xilli faraaqada.

Waxaa kaloo la xiriir kartaa Servicecenter 019-21 10 00, servicecenter@orebro.se ama servicecenter@t-meeting.se (luqada ishaarada ama dhagoolaha).

In other languages

The information above is also available at our preschools/schools in Arabic, English, Finnish, Sorani and Somali. Contact your preschool or our Service Centre at 019-21 10 00 or servicecenter@orebro.se if you have any questions.